




Biyo dhaqaaleey – lacag dhaqaaleey




københavns 

Waxaa jira labo sababood oo muhiim ah oo biyaha loo dhaqaaleyso: **bay'adda** iyo **jeebkaaga**!

Marka qofku tubbada furo, dhar dhaqayo ama qubeysanayo, inta badan kama fekeru inta biyo ah uu isticmaalayo – ama inta ay kukacayaan. Biyo fara badan ayaa baxa muddadaa toddobaadka, bisha ama sanadka, biilka biyuhuna si degdeg ah ayuu kor ugu kacaa. Haddii aad biyo dhaqaaleyso, waxaad sidoo kale dhaqaaleyneysaa lacag - waxana wanaagsan in lacag la dhaqaaleeyo oon lagu ciyaarin! Biyaha dhulka waxay meelo badan halis ugu jiraan sumoobid. Sunta warshadaha iyo beeruhu ciidda ayey dhex jeexaan oo waxay hoos u galaan biyaha aan cabno si markaas aan dib ugu isticmaalin. Sidaa darteed, muhim ayey noo tahay inaan dhowrno biyaha aan haysanno. Haddii aynaan biyaha dhaqaaleyn, waxaan halis u geleynaa in biyaha aan heleyno mustaqbalka ee nadiifka ah ay yaraadaan. Ugu danbeyntii, waxaa biyaha la cabbo saameynayaan carruurteenna iyo carruurta aan abkowsaalka u nahay.






Beddelidda musqulaha, makiinadaha, tubbooyinka, iwm.

Haddii aad ku nooshahay guri lagu oggol yahay inaad beddelato makiinadaha ama rakibato, waxaad badbaadin kartaa biyo fara badan – iyo lacag fara badan – adigoo:

- Musqushaada u beddelaya musqul biyaha keydisa. Musqulihii hore halka biyaha lagu deyn jiray waxay isticmaalaan ilaa iyo 15 litir oo biyo ah halkii mar ee aad biyo ku deysaba, halka musqulaha biyaha dhaqaaleeya, aad dooran karayso inta u dhexeysa biyo ku deyn ballaaran iyo mid yar oo kala ah 6 ama 3 litir
- Raadso tubada qubeyska ee biyaha dhaqaalaysa. Tan macnaheedu wuxuu noqon doonaa in aad isticmaasho biyo kala badh ka yar kuwii tubbooyinka qubeyska caadiga ahayd, taasoo ah inta u dhexeysa 6 iyo 12 liitar daqiiqaddiiba
- Makiinadaha dhar dhaqidda iyo kuwa alaabta dhaqa ku beddel kuwo cusub, oo leh moodooyinka tamarta iyo biyaha dhaqaaleeya (A-ku calaamadaysan)
- Afka tubbada ningaxa – hawo qasooyinka – ku dheji tubbooyinka ama u beddel tubbooyin 'labo marxadle' ah halkaasoo aad u baahanayso inaad tubbada kor u qaaddo si aad biyo fara badan uga heshid.



Sidee ayaad adigu biyo u dhaqaaleyn kartaa ... iyo lacag?


Musqusha gudaheeda

- Isha ku hay in musqushu ay biyo dhibco ah deyso; musqusha biyo deyneysa, xataa haddii ay aad u yar yihiin oo aysan suuragal ahayn in la arko wuxuu isticmaali karayaa 300 oo litir oo biyo ah maalintiiba taasoo ku dhiganta ilaa 110 m³ sanadiiba, wuxuuna ku kacaa in ka badan 4500 karoone!
- Xaqiiji in tubbada aysan biyo dhibceyn. Tubbada biyaha dhibceysa waxay maalintiiba isticmaali kartaa 20 liitar oo biyo ah. Tani waxay ku kacaysaa DKR 300 sanadkiiba.
- Xir tubbada inta aad cadayaneydo ama rumeysaneyso.
- Gaabi socodka tubada ama xir biyaha inta aad saabbuunta is marineyso
- Iska daa inaad ku qubeysato berkad.



Jikada gudaheeda

- Isticmaal baaquli marka aad khudradda dhaqayso.
- Isticmaal baaquli marka aad gacanta ku dhaqayso
- Haddii aad leedahay makiinadda alaabta dhaqda, alaabta ka buuxi ka hor inta aadan billaabin. Ha raacsiin saxammada biyo. Waxaa ku filan inaad ka tirtirto cuntada ku dheggaan. Isticmaal barnaamij gaaban oo heerkulka ugu hooseeya ah.
- Raaci khudradda xaddiga biyood ee ugu yar ee suuragalka ah – waxaad badbaadin doontaa biyo iyo koronto labadaba, runtiina sidaas ayaa caafimaad badan!



Marka aad dhar dhaqayso

- Dharka ka buuxi makiinadda
- Iska daa midda dhaqidida ka horreysa – tan badanaa muhiim ma aha.
- Dharkaaga ha dhaqin ilaa ay dhab ahaantii wasaq ka noqdaan.
- Ku dhaq dharkaaga heerkulka ugu hooseeya ee suuragalka ah – muhiim ma aha in dharka la dhaqayo la karkariyo. Inta badan waxay si habboon nadiif ugu noqonayaan 30-40 darajo.